

## **Dardargelinta Fasalka oo dhan**

### **(Hagida Qoysaska)**

Ardayda xanaanada ilaa fasalka 7aad waxay u qalmaan inay codsadaan dardargelinta Fasallada oo dhan (WGA).

### **Habka**

**Xilliga Codsiga GU'GA:** bartamaha Abriil ilaa bartamaha May ee WGA sannad dugsiyeedka soo socda

**Xilliga Codsiga DAYRTA:** labada toddobaad ee ugu horreeya Sebtembar ee WGA sannad dugsiyeedka hadda

Dugsiyadda Dadweynaha ee Portland waxay isticmaashaa IOWA Qiyaasta Dardargelinta, daabacaadda 3aad (IAS-3) si ay u qiimeeyaan ardayda qiimaynta fasalka oo dhan. IAS-3 waxaa la sameeyay ka dib dhowr iyo toban sano oo la shaqeynayey ardayda loo tixgeliyey dardargelinta fasalka oo dhan. Mid ka mid ah tixgalinta muhiimka ah ee dardargelinta fasalka oo dhan, iyo sifo gaar ah oo xooggan ee IAS, ayaa habaynaysa habraacyada go'aan gaarista si loo hagaajiyo suurto galnimada in xog waafi ah la ururiyo oo go'aamo ujeedo leh la gaaro.

**Waxyaabaha Muhiimka ah: Haddii mid ka mid ah waxyalahan uu jiro, dardargelinta fasalka oo dhan laguma talinayo**

- Ardayga waxa loo dedejin doonaa isla fasal ama ka sareeya walaalkooda.
- Ardayga hadda wuxu leeyahay walaal isku fasal ah.
- Ardayga wuxuu tilmaamay inuusan doonanin in la dardargeliyo fasalka oo dhan.
- Buundooyinka Akhriska iyo Xisaabta ee MAP waxay ka hooseeyaan boqolkiiba 90 ee xeerarka GU'GA ee fasalka *la dhaafi karo*.
- Dhibcaha kartida ardayga ee qiimeynta CogAT waxay ka yar tahay 115 (waxaa lagu qiyaasi karaa codsi dugsi).

Si aad u bilowdo nidaamka dardargelinta fasalka oo dhan, la xiriir macalinka ilmahaaga. Haddi aanay jirin waxyalo muhiim ah, macalinka ilmahaaga waxa uu la shaqayn doona fududeeyaha TAG ee dugsiya iyo TAG TOSA si loo sameeyo imtixaano dheeraad ah (hoos eeg). Marka imtixaanka dhamaado, macalinka ubadkaaga ayaa kula soo xiriiri doona si uu sameeyo kulan lagaga hadlayo natiijada oo uu dib u eego sharciyada go'aanka ee hoose. *Shuruudaha ugu yar waa in la buuxiyaa weji kasta si loo sii wado hawsha.*

## Imtixaanka

Dardargelinta Fasalka oo dhan, waaxda TAG waxay isticmaashaa IOWA Qiyaasta Dardargelinta, daabacaadda 3aad (IAS-3). Tan waxaa ka mid ah isticmaalka Imtixaanka Awoodaha Garashada (CogAT) ee imtixaannada garaadka, Imtixaanka IOWA ee Xirfadaha Aasaasiga ah (ITBS) ee heerka fasalka ee imtixaanka guusha, iyo ITBS ee ka sarreeya heerka fasalka ee imtixaanka karti-xirfadeed.

## Xeerarka Go'aanka

Cabiro badan ayaa loo isticmaalaa si loo go'aamiyo u diyaargarowga ardayda dardargelinta fasalka oo dhan. Miisaanka IAS waxa uu tilmaamayaa dhibco badan oo xog iyo macluumaad ah, oo ay ku jiraan:

**Dib-u-eegis Waxyalaha Muhiimka ah:** Tallaabada ugu horreysa ee dardargelinta fasalka oo dhan waa in dib loo eego waxyalaha muhiimka ah ee kor ku taxan. Haddii mid ka mid ah shayyada uu jiro, dardargelinta fasalka oo dhan laguma talinayo. La xiriir qoyska si aad ugala hadasho fursadaha kale ee buuxinta baahida waxbarasho ee ilmahooda.

**Xogta Qiimaynta:** Hab-maamuuska IAS-3 waxa uu isticmaalaa xogta qiimaynta tusaha awoodda akadeemiyadeed, kartida, iyo kasbashada ku salaysan buundooyinka isku dhafan ee qiimaynaha CogAT iyo ITBS. *Dhibcaha ugu yar ayaa loo baahan yahay si loogu gudbo wajiga xiga ee habka codsiga.*

**Kooxda Dugsiga:** Wadahadalka koox ahaan ee ku saabsan ardayga, iyo saadka sida meesha ilmaha la geyn doono, arin kasta oo ay tani abuuri karto, sida gaadiidka, iwm.

**Su'aalaha Macallinka:** Macallinka fasalka ee hadda ayaa ka jawaabaya su'aalaha khuseeya ilmaha oo dhan, oo ay ku jiraan u diyaarsanaanta korriinka iyo bulshada/dareenka. Jawaabaha waxay leeyihiin qiyamka dhibcaha taasoo tilmaamaysa u diyaarsanaanta qaybaha aan tacliinta ahayn.